

Ogoosto 2007/August 2007
SHPN (CBD) 07/136SO (Somali)

**Adeega Kontoroolka & Ka hortaga Qaaxada ee NSW
NSW Tuberculosis Prevention & Control Service**

**Infekshinka Qaaxada ee Qarsoon (LTBI) iyo daaweynta ka
hortaga ah**

- Dhakhtarkaaga ayaa kuu qorey kuura daawo ah si looga hortago Qaaxada (TB).
- Daawadaan waxaa lagu siinayaa sababtoo ah waxaad leedahay mid kood::
 - Baaritaanka maqaarka ee ee tiibiida oo lagaa helay(oo sidoo kale layiraahdo TST ama baaritaanka Mantoux) ama
 - Raajada xabadka oo aan caadi aheyn, ama
 - Waxaad la xiriirtey qof leh infekshinka qaaxada TB.
- Waxyaalahan waxay tilmaamayaan inay u muuqato inaad yeelaneyso infekshinka TB oo noqon kara cudurka TB .

**Waa maxay kala duwanaanshaha u dhaxeeya infekshinka TB iyo cudurka TB ?
InfekshinkaTB :**

- Qabitaanka TST wuxuu tilmaamayaa infekshinka TB .
- Marka qofi qabo infekshinka TB jeermiska TB ayaa ku jira jidhka, laakiinse ma aha mid firfircoon lagumana faafin karo dad kale.
- Kaysaska badidooda (90-95% dadku), habka difaaca jirka ayaa kontoroola jeermiska cudurka TB kuma dhalanayo.
- Dadka qaba infekshinka TB infection keliya ee aan laheyn wax calaamado ah ee fiican.

Cudurka TB :

- Qiyaaastii 5-10% oo dad ah qabana infekshinka TB ,cudurka TB ayaa sameysmi kara, markaas oo jeermiska aan firfircooneyn ee TB uu noqdo mid firfircoon oo laba jibaarma.
- Tani waxay dhici kartaa xitaa sannado badan ka dib, badanaa marka uu daciifo habka difaaca jidhku. Taas waxaa laga yaabaa inay keento gabowga, jirro khatar ah , daroogo ama isticmaalka khamrada, Infekshinka HIV (fayraska keena AIDS), ama xaalado kale.

Infekshinka TB	Cudurka TB
Jeermiska TB ee jirka ku jira oo aan firfircooneyn	Jeermiska TB ee jirka ku jira oo firfircoon
Aan laheyn wax calaamad TB	Calaamadaha TB sida qufaca, xumada culeyska oo yaraada
Kuma faafin karo jeermiska TB dadka kale	Waxaa laga yaabaa inuu ku faafiyo jeermiska TB dadka kale
Waxaa laga yaabaa inuu u baahdo daaweynta infekshinka TB si looga hortago faafida cudurka TB	Waa inuu qaataa daaweyn si loo daaweeyo cudurka TB

Waa maxay daaweynta infekshinka TB ?

- Daawada caadiga ee la siiyo si looga hortago TB waa isoniazid, inkastoo daaweyn kaleba la isticmaali karo.
- Daawooyinkan waxaa la qaataa maalin kasta ugu yaraan 6 bilood, maadaama ay qaadato wakhtigan dheer si ay u disho jeermiska aan firfircooneyn ee TB .
- Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo pyridoxine (Vitamin B6) tsi looga hortago saameynta suurtagalka ah ee ay leedahay Isoniazid.

Ma xannuusanayo, ma u baahanahay inaan daawo qaato?

- Inkastoo aadan xannuusaneynin, daaweynta infekshinka TB wakhti hore ayey dili kartaa jeermiska TB ee ku jira jidhkaaga, wuxuuna kaa caawin karaa ka hortaga cudurka TB .
- Daaweynta infekshinka TB ayaa kaa caawin karta ka hortaga cudurka TB dadka badidiisa dhameysta daawada loogu talagalay oo dhan.

Daaweynta infekshinka TB ma ammaanbaa?

- Daawooyinkan waa ammaan dadka badidiisuna (oo ay ku jiraan carruurto) wax dhib ah ma arkaan markay qaadanayaan daawada.
- Dadka qaarkii baa laga yaabaa inay ku yeeshaan saameyn ay ka mid tahay:
 - Calool xannuun
 - Maqaarka iyo indhala oo jaalle ah
 - Kaadi madow(sida shaaha rinjiga aha kafeega)
 - Rabitaan la'aanta cuntada
 - Yalaalugo ama matag
 - Cuncun ama finan yar yar ooka soo baxa
 - xumad
 - daal fara badan
 - xaxadansho faraha iyo faraha cagaha

fadlan wargeli dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada isla markiiba haddii aad isku aragto astaamahan wax ka mid ah oo aad ka welwelsan tahay. Inkastoo ay aad dhif u tahay waxyeelada ugu daran ee iman kartaa waa beerka oo shaqeyn waaya. Taasna waxaa layskaga ilaalin karaa iyadoo si taxadar leh uu ula socdo dhakhtarkaagu.

Sidee baan u qaataa daawada?

- Waa inaad liqdaa dhammaan daawada isku mar maalin kasta.
- Si lagaaga caawiyo inaan xasuusato qaadashada daawadaada, waxaa laga yaabaa inuu ku caawiyo calaamadeynta jadwalka taariikhda ama xusuus qor maalin kasta, ama daawadaada qaado hal saac ka hor xilliyada cuntadaada mid ka mid ah.
- Haddii aad ilowdo inaad qaadata daawadaada maalin, doosihii caadiga ahaa qaado maalinta ku xigta(laakiinse ha qaadan laba dooso maalinta ku xigta) haddii aad ilowdo mar mar badan, waxaa laga yaabaa inaysan daawadu noqon mid wax ku ool ah oo disha dhammaan jeermiska TB . Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada haddii aad sii wado ilaawitaanka daawadaada.
- Waa inaad cabin khamrada intaad qaadaneyso daawada. Dhakhtarkaaga weydii ka hor intaad qaadan wax daawo ah oo cusub (oo ay ku jirta ta aad ka soo gadato farmashiyaha ama daawooyinka xoojinta ah tusaale paracetamol), maadaama qaar waxyeelaan daawooyinka loogu talagalay ka hortaga TB.

Miyaan u baahanahey inaan u sheeg ciduun daaweyntayda infekshinka TB ?

- Dadka qaba infekshinka TB keliya uma gudbin karaan TB cid kale, saa daraadeed looma baahna inaad u sheegto ciddaad wada shaqeysaan, dugsiiga ama jaamacada haddii aadan dooneynin. Waa inaad u sheegtaa dhakhaatiirta kale ee aad aragto macluumaadkana waxay u heyn doonaan si qarsoodi ah.

Waxyaalo kale oo loo baahan yahay in tixgeliyo

Ka sokow waxyaalaha kor lagu soo sheegay:

- Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga haddii aad qabto dhibaatooyin kale oo caafimaad ama haddii aad dooneysid inaad uur qaado.
- Waad wadan kartaa dhammaan nashaadkii aad sameyn jirtay intaad qaadanaysay daawooyinkan.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah

- Wakhtiga aad qaadaneyso daawada waxaa si joogta ah kuu arki doona dhakhtar ama kalkaaliye si loo eego horumarkaaga, laakiinse haddii aad dooneysid macluumaad dheeraad ah la xiriiir rugtaada caafimaadka ee xabadka ama u tag dhakhtarkaaga.